



Adeegyada Sugida Guriyaynta ayaa kugu caawin kara sadex qaab:

- **Bixiyaha adeegyada kala guurka guriyaynta** ayaa kaa caawinaaya qorshaynta, helitaanka, iyo u guurista guri.
- **Adeeg bixiyaha joogtaynta guriyaynta** ayaa kaa caawinaaya inaadan guriga lumin kadib markaad usoo guurto.
- **La taliyaha guriyaynta** ayaa kaa caawinaaya abuurista abuurista qorshe qofka diirada saaraaya haddii aadan haysan maaraynta kiiska Caawimaad Caafimaad (MA).

Ogoow: Adeegyada Sugida Guriyaynta Guriyayntu ma baxshaan qarashaadka guryaha ama badeecooyinka.

1-866-333-2466
disabilityhubmn.org



Si aad u hesho noocyada aad isticmaali karto ee daabacaadaan ama helitaanka dheeraadka ah ee loo siman yahay ee adeegyada aadanaha, qoraal u dir dhs.adultincomesupport@state.mn.us, wac 651-431-3300, ama adeegso adeega aad doorbidayso ee dhagoolaha.



Gunnooyinka Guriyaynta 101 waxaa maal gashay deeqda Minnesota's Money Follows the Person. Moving Home Minnesota ayaa la maamulaa iyadoo la kaashanayo World Institute on Disability..

CAAWIMAAD CAAFIMAAD (MA)

Adeegyada Sugida Guriyaynta

Ka caawinta dadka naafada ah iyo dadka waayeelka ah helitaanka iyo haysashada guryaha



Yaa Heli Kara Adeegyada

Waad heli kartaa Adeegyada Sugida Guriyaynta haddii aad:

- Haysato Caawimaad Caafimaad
- Aad jirto 18 ama ka wayn tahay
- Aad qabto naafo ama xaalad ku naafaysa
- Ku jirto mid kamid ah xaaladaha soo socda:
 - Hooy la'aan tahay ama aad khatar ugu jirto hooy la'aan inaad noqoto
 - Aad ka guurayso xarun, hooyga kalkaalinta, ama xarumaha jameecooyinka qaarkood, ama
 - Aad khatar ugu jirto in xarun lagu dhigo.
- Ku qiimeysan tahay inaad u baahan tahay caawimaad ku aadan ugu yaraan mid kamid ah aagagaan:
 - Hadalka
 - Dhaqdhaqaaqa
 - Go'aan gaarista, ama
 - Maaraynta dareemada iyo dabeecadaha
- Aadan ka helayn adeegyada kuwaan oo kale ah barnaamijyo kale.

Sida Loo helo Adeegyada

TALAABADA 1. Qiimayn hakugu sameeyo...

- Xirfadle tababaran, sida xirfadlaha caafimaadka dhimirka, dhakhtarka kalkaalinta, ama dhakhtar guud
- Qiimeeye shahaado leh (qiimaynta MnCHOICES)
- Iskuduwaha sare ee daryeelka, ama
- Qiimeeyaha gelitaanka Abaabulan.

TALAABADA 2. Samayso Qorshe Qofka Diirada Saaraaya...

- Haddii aad haysato maareeyaha Shardi Dhaafka MA, iskuduwaha sare ee daryeelka, ama maareeyaha kiiska yoolaysan, qofkaas ayaa kaa caawinaaya wax ka badalka qorshahaaga si loogu daro Adeegyada Sugida Guriyaynta.
- Haddii aadan haysan wax dadkaan kamid ah oo ku caawinaaya, waxaad heli kartaa caawimaad ku aadan abuurista Qorshaha Guryaha Diirada lagu Saarayaa ee Calaa Qofka ah ood ka helayso la taliye guriyaynta oo shahaado haysta.

Cid kasta oo kaa caawisaba qorshahaaga qofka diirada saaraaya, adigga ayaa leh go'aanka adeeg bixiyaha kaa caawinaaya kala guurkaaga guriyaynta iyo adeegyada sugida guriga.

TALAABADA 3. Hel Ansixin...

Intaas kadib, qiimayntaada, cadaynta naafanimadaada, iyo qorshaha qofka diirada saaraaya ayaa loo dirayaa Waaxda Adeegyada Aadaha (DHS, Department of Human Services) si ay u ansixiso.

WIXII XOG DHEERAAD AH

Si aad xog dheeraad ah uga hesho Adeegyada Sugida Guriyaynta ee MA:

- Booqo mn.hb101.org si aad ula hadasho khabiirka HUB
- Kala xariir Disability Hub MN lambarka 1-866-333-2466
- La xariir maareeyaha kiiskaaga ee MA
- La xariir wakaalada Adeegyada Aadanaha ee qabiilkaaga ama degmadaada

